# TAXANAHA DHAXALREEB I/2016

Seebtember 2016 Ponte Invisibile Ed.

# Gorfeyn Sheeko
# "Rooxaan", Shire Jaamac Axmed, 1973

*Barmaamijka Weeleynta Suugaanta Afka Soomaaliga iyo Ereyadiisa – somalicorpus.com.*

Jaamac Muuse Jaamac

Abriil 2015 [dib u eegid Seebtember 2016]

PONTE INVISIBILE

Waxa daabacday Ponte Invisibile Edizioni, Seeska Hiddaha iyo Dhaqanka "Redsea"
Seebtember 2016 – Daabacaddii Kowaad – Hargeysaa

Taxanaha Dhaxalreeb:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay
[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka.
[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal.
[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?
[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.
[6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed
[7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007
"Dhulgariir" waa digniin culus
[8] Khaalid Jaamac Qodax, Oktoober 2007
Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"
Maansoyahan mudh baxay!
[9] Xasan C. Madar, Maarj 2008
Raad ka mid ah raadadkii addoonsiga.
[10] Aadam Xaaji Cali Axmed, Seebtember 2008
Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa
[11] Ayaan Maxamuud Cashuur, Oktoober 2008
Toddobaadka Fanka iyo Suugaanta Soomaalida ee Landhan
[12] Xasan C. Madar, Diisember 2008
Ruwaanda: Xasuuqii boqolka maalmood
[13] Mohamed-Rashiid Sheikh Hassan, Diisember 2008
Art and Literature: The Other Weapon for Resistance
[14] Kamaal Cabdillaahi Xuseen, Abriil 2009
Iskaddaa sonkorta oo ka gaashaamo cudurka kaadi-macaanka noociisa labaad
[15] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Noofember 2009
Aqoontii iyo ibaxnimadii Soomaalida
[16] Mohamed Obsiye, December 2010
Somaliland's Search for Recognition
[17] Jama Musse Jama, May 2012
We lost a friend
[18] Jama Musse Jama, Feeberwari 2015
*Aqoon iyo Afgarad* waa murti ku habboon in maanta la isu sheego: Gorfeyn riwaayadeed
[19] Jama Musse Jama, Seebtember 2016
*Gorfeyn Sheeko: "Rooxaan", Shire Jaamac Axmed, 1973*

Taxanaha Dhaxalreeb waa qoraallo kusoo baxa degalka redsea-online.com dhowr jeer si aan aan joogto ahayn sannadkii. Waxa isku dubbarida Jaamac Muuse Jaamac, waxana daabaca soo saarha Ponte Invisbile Ed. oo deggan Pisa, Italy.

Ka rogo si bilaash ah www.redsea-online.com/e-books.

**“Rooxaan”, Shire Jaamac Axmed, 1973 - Barmaamijka Weeleynta Suugaanta Afka Soomaaliga iyo Ereyadiisa**

Jaamac Muuse Jaamac | jama@jamamusse.com

“Rooxaan”, 1973

Sheekada “Rooxaan” (1973) waxa ay ka mid tahay qoraallada loo doortey in ay ka mid noqdaan mashruuca weeleynta Suugaanta Afka Soomaaliga iyo ereyadiisa. Tixraaca qoraalku waa “Shire J. Axmed, Rooxaan, Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Xamar, 1973”. Shire Jaamac Axmed waa qoraa leh buugaag dhowr ah, waxana lagu xusuustaa, oo uu soo-saare ka ahaa, wargeys ka soo bixi jirey Jamhuuriyaddii Soomaaliya dabayaaqadii lixdameeyada qarnigii tagay, oo la odhan jirey Iftiinka Aqoonta (1969-). Wuxuu qorey waagaa laba sheeko, “Rooxaan” iyo “Halgankii Nolosha”. Shire Jaamac Axmed waxa uu kaalin muhiim ah ka soo qaatey doorashadii farta Af Soomaaliga lagu qori doono, isaga oo ka mid noqdey guddiyadii kala duwanaa ee Af Soomaaliga. Soo jeedinta faraha la kala dooranayo iyo hirgalinta doorashadii ka dib ba, Shire Jaamac Axmed (AHU) waxa uu kaga jirey kaalin wayn qoritaanka Af Soomaaliga.

Barmaamijka Weeleynta Suugaanta Afka Soomaaliga iyo Ereyadiisa waa barmaamij cilmi-baadhiseed oo lagu dhisayo kaydka ereyga Afka Soomaaliga. Waa weel ay ku kaydsan yihiin ereyada Af Soomaaliga, rogaanroggooda, abtirintooda, abla'ablaynta qaybta hadalka, sida erey kasta loogu adeegsado hadalka: tix iyo tiraab, cilmiga iyo madaddaalada, afka dowliga iyo kan cilmi barashada, sheekada male-awaalka ah, curisyada, suugaanta qoran iyo ta laga dhawaajiyo, tu hore u kaydsan qoraal ahaan iyo kuwa hadda isla barmaamijkan loo qoro ba (tus: maansoyahanno laga dhagaysto suugaantooda oo laga qoro).

Sheekadan Rooxaan iyo qoraageeda, marka laga tago ereyada sii lumaya ee ay ka mid yihiin yaleex, afjig, iwm. oo lagu adeegsaday halkan, labada arrimood ee dhugashada gaarka ah u baahani waa 1) adeegsiga falka ‘afjig’ (oo hadda uu falka kale ee cabudhi meesha ka sii saarayo), iyo 2) ‘illowse’ oo macnaha uu qoraagu sheekadan ugu adeegsanayaa sii tirtirmaayo; iyo kuwa kale oo hoos ku taxan.

**Farsamada gelinta qoraalka**

Sheekadan waxa laga sawiray buuggii lagu daabacay Xamar (Madbacadda Qaranka, Wasaaradda Hidda iyo Tacliinta Sare, 1973), dabadeedna waxa lagu akhriyey barmaamijka "ABBYY Finereader 12" oo suureeya xarfaha sawiran (OCR), kolkaas ayaa higgaadda dib loo saxay goobihii uu barmaamijku gefka ku sameeyey oo dhan, iyada oo la la beegsanayo qoraalkii rasmiga ahaa. Waxa kaliya oo la beddelay ereyadan hoos ku tilmaaman, oo ah gefaf higgaadeed ama farsamo oo ilduuf ah. Astada [n:m] waxa ay u taagan tahay halka wax laga beddelay marka loo eego qoraalkii daabacnaa (n=bogga, m=sadarka).

Ugu danbayn faalladani kuma saabsana dulucda sheekada. Waxa ay ku eg tahay farsamada qoraalka iyo adeegsiga ereyga ee qoraaga. Muhimadduna waa kaydinta qoraalkan oo aannu ku aragnay in uu qiime sare oo xagga farsamada, iyo nuxurkaba, leeyahay, kuna tilmaaman yahay suugaanta toolmoon ee Afka Soomaaliga ku qoran.

**Waxaa laga beddelay:**

1. [1:3] shire > Shire
2. [3:28] inuu uga jawaabo wiilkiisu weydiiyey > inuu uga jawaabo [su'aasha] wiilkiisu weydiiyey.
3. [4:4] raca > raaca
4. [5:5] Saaleh > Saalax
5. [5:7] shiikh > Shiikh
6. [6:38] "ayuu a aaminsanaa" > "ayuu u aaminsanaa"
7. [7:36] Isagi > isagu
8. [9:1] "Maandow" > "Maandhow"
9. [9:26] haddi > haddii
10. [9: 28] naagod > naagood
11. [10:17] "carrurta" > "carruurta"
12. [10:31] "shiikh" > "Shiikh"
13. [14:16] "Wuu joogaa?" > "Wuu joogaa"

**Ereyada faallada u baahan ee aan se la beddelin:**

1. [3:1] “Waalidyadiis” waxa ku saxnaan lahaa “Waalidkiis” waayo marka hore ayuu badi (jamac) yahay ereygu.
2. [14:14] “marakan” > iminka wax la wada qoraa “markan”. “Marakan” hadal suuqdi ayuu iila eeg yahay.
3. Adeegsiga Muqdishow (ee aan la qorin Muqdisho) waa arrin xiise leh.

**Ereyada ama tuducyada xiisaha leh ee dhugmo u sii baahan:**

1. [3:6] “yaleex jilicsan” > ereyga yaleex ee la midka ah “yix” meel hore oo lagu adeegsaday ma ku jirin ururinta, marka laga reebo qaamuuska.
2. [3:24] “afjigi jirey” > falka “afjigi” waxa meeshii ka saaray “cabbudhi” wuuna sii lumayaa. Macnaha ugu qeexan Qaamuuska Af Soomaaliga (diyaarintii Annarita Puglielli iyo Cabdalle Cumar Mansuur) waxa ugu qeexan yahay “(-gay, -gtay) Qof hadlaya, iyadoo loo diidayo inuu sheego sir ama wax aan habboonayn hadal ka joojin.”
3. [4:6] “ku jilnaa” > “jilnaa”, jilnaansho oo macneheedu yahay la noolaansho adeegsigiisu wuu yaryahay.
4. [4:32] “illowse” > qoraagu wuxuu u adeegsanayaa ereygan si la macno ah “haseyeeshee”, “laakiinse”. Hore uma aan aqoon dhismahan, inkasta oo macanahanu ku qeexan yahay qaamuuska. Dhowr meelood oo kale na wuu ku adeegsaday (eeg is sawirka 3aad “is oggolaanshaha ereyga ‘illowse’”).
5. [5:6] “idilu” > anigu waxaan qori lahaa “idili”, ma u muuqato higgaad qaldan, waayo meelo kale oo u eeg ayaan dareemay.
6. [6:8] “baabuurka gaarigiisa” > waxa aad mooddaa in labadan erey ee “gaari” iyo “baabuur” oo iminka isku sammi loo adeegsado, in Shire Jaamac u kala yaqaannay baabuurka iyo buudhigiisa.
7. [9:12] “lehu” > anigu waxa aan qori lahaa “lehi”, ma u muuqato higgaad qaldan (la eeg faalada kore 2. “idilu”)

**Doorbideennada qoraaga ee sheekadan Rooxaan: *Uusan* mise *Uunan*.**

Qoraagu waxa uu doorbidayaa in uu adeegsado qaabkan danbe (uunan). 14 jeer ayuu adeegsada uunan halka uu markaliya ka adeegsaday uusan.


Tirada guud ee ereyada uu qoraagu adeegsaday 3820, iyadoo 1345 erey uun ay soo noqnoqnayeen. Shanta erey ee ugu adeegsida badani waa kuwan hoos ku taxan. Waxa aad si gaar ah u eegi kataa sawirka 1aad ee ku tusaaya is oggolaanshaha ereyga “wuxuu”:

- wuxuu 116
- Guhaad 104
- oo 92
- ayuu 91
- ku 8

Sawirka labaad na waxa uu muujinayaa is cugashada lammaanaha horsan ee ereyda, oo aynu ka arkayno in shanta lammaane ee ugu soo sarreeyaa ay yihiin


- “Shiikh Muxsin”,
- “wuxuu ku”,
- “Shiikh Saalax”,
- “Guhaad wuxuu”
- “ka soo”.

Ugu danbayn sawirka 3aad waxaad ka eegtaa is oggolaanshaha ereyga “illowse” iyo sida uu qoraagu u adeegsaday oo u dhigmaysa “haseyeeshee” amase “laakiinse”.





| Sadarka | Ka hore | Ereyga | Ka dib |
|---|---|---|---|
| 69 | Guhaad | wuxuu | ku noolaa Muqdishow. Waalidyadiis |
| 71 | yihiin, timihiisuna waa yaleex jilicsan. Sankiisa | wuxuu | uga eg yahay aabbihiis oo wuu toosan yahay. Joogg |
| 73 | aha Guhaad wuu fidsanaa. Intuusan iman Muqdishow, | wuxuu | ku noolaan jirey tuulo. Tuuladaas waxaa lagu maga |
| 75 | Guhaad marku cayaarta ka soo noqdo, | wuxuu | ula imaan jirey aabbihiis weydiimo badan ee ku sa |
| 77 | Aabbihiis wuu afjigi jirey wiilkiisa oo | wuxuu | dhihi jirey, «llaah baa naga og |
| 79 | Shiikh Saalax, | wuxuu | ahaa wadaad buuran oo madaxa cimaamad ku sita. Re |
| 81 | Shiikh Saalax. lyagu waxay dhihi jireen «Shiikhu | wuxuu | leeyahay karaamo badan. Isagu waa weli Alla» Shii |
| 83 | Dadka buka Shiikhu | wuxuu | u tufi jirey tahaliil, |
| 85 | , Shiikh Saalax wuu ka birbirayey. Isaga oo idilu | wuxuu | ahaa nin yaab leh. Guhaad intaas oo dhan wuu ku o |
| 87 | llaah oon aadmigu cilmi ku lahayn. Shiikh Saalax | wuxuu | uga sheekeeyey wiilkii, inay Moqdishow jiraan nim |
| 89 | Guhaad | wuxuu | jecleystay inuu Muqdishow u dhoofo oo uu soo arko |
| 91 | maha ka mid ah, kaga soo tegey Gellinsoor. Guhaad | wuxuu | ku soo dhuuntay baabuur weyn oo xoolaha iyo dadka |
| 93 | Sannadkaas | wuxuu | ku dhameeyay jus-camma. Guhaad markaan wax wuu ak |
| 95 | d Muqdishow, ayuu shoqo ka helay. Maalintii isagu | wuxuu | ku shaqayn jirey 3 shilin. Makhaayad ayaa habarya |
| 100 | oogo, ayaa ninkii makhaayadda lahaa yimid. Guhaad | wuxuu | u sheegay ninkii in lacagtii laga xaday. Ninkii w |
| 104 | axaa la yiraahdaa «Shiikh Muxsin». Guhaad markaas | wuxuu | haystay lacag 200 oo shilin ah oo uu ka shaqaysta |
| 106 | in. Markuu dadka rooxaanta uga warramayo, Shiikhu | wuxuu | ka qaataa lacag badan. Guriga Shiikh Muxsin waa m |
| 108 | ska aamustaa. Shiikh Muxsin haddii ay ka carooto, | wuxuu | u sheegaa inuu furi doono, haddaynan masayrka isk |
| 110 | Shiikh Muxsin | wuxuu | hadda ka hor guursaday shan iyo toban naagood. Dh |
| 112 | . Wuxuuse aad wax u cunaa qadada. Dad badan, ayaa | wuxuu | allabari ugu keenaa waxaro dhaylo ah Shiikha, lac |
| 114 | , isaga oo ulajeeda middaas xurmo. Guhaad markaas | wuxuu | gacanta Shiikha ugu laabay 100 shilin. Shiikh Mux |
| 116 | arafuun. Guhaad hadalkii Shiikha war kama celine, | wuxuu | ku degdegay dukaamada. Wuxuu soo gaday wixii Shii |
| 118 | day waxay ku fariistay 70 shilin. Guhaad alaabtii | wuxuu | ula orday Shiikha. Wuu u geeyey. Shiikhu alaabtii |
| 120 | baqayey rooxaantii uu riyada ku arkay. Cariishku | wuxuu | leeyahay daldaloollo. Gudaha cariishka waxaa ku d |
| 122 | Wadnihiisu | wuxuu | lahaa rug-rug. Markaas ayuu albaabkii furay marki |
| 124 | a ka soo baxay bulaan. Guhaad wuu farxay markaan, | wuxuu | na moodayey inay rooxaantu u sheegi doonto meesha |
| 126 | nbe ayuu ku noqday gurigii Shiikh Muxsin. Markaan | wuxuu | doonayey inuu ogaado runta keliya. Guhaad markaan |
| 128 | Gurigu | wuxuu | ahaa mugdi, Shiikhuna |
| 130 | ay. Intuunan ka bixin gurigii Shiikh Muxsin, ayuu | wuxuu | xusuustay maahmaahdii lahayd «Meeshii iftiin soo |

Sawirka 1aad: is oggolaanshaha ereyada ku xeeran “wuxuu”.




| Heerka | Is cugashada lammaanaha | Kalgalka | Horraad | Danbeed |
|---|---|---|---|---|
| 5.554588851777638 | shiikh muxsin | 29 | 69 | 34 |
| 3.0000000001 | wuxuu ku | 22 | 116 | 87 |
| 5.459431618737297 | shiikh saalax | 20 | 69 | 25 |
| 1.5849625008211563 | guhaad wuxuu | 12 | 104 | 116 |
| 2.321928094987362 | wuxuu u | 12 | 116 | 74 |
| 3.700439718241092 | ka soo | 11 | 73 | 43 |
| 5.614709844215208 | markii uu | 11 | 23 | 37 |
| 4.523561956157013 | wuxuu ahaa | 10 | 116 | 14 |
| 3.0000000001 | guhaad wuu | 10 | 104 | 41 |
| 2.321928094987362 | ayuu u | 10 | 91 | 74 |
| 3.9068905957085187 | waxaa ka | 9 | 30 | 73 |
| 4.906890595708519 | ku arkay | 9 | 87 | 13 |
| 1.5849625008211563 | ayuu guhaad | 8 | 91 | 104 |
| 2.807354922157604 | ku soo | 7 | 87 | 43 |
| 4.0000000001 | ku yiri | 7 | 87 | 19 |
| 1.5849625008211563 | ayuu ku | 7 | 91 | 87 |
| 2.807354922157604 | waxay ku | 7 | 40 | 87 |
| 2.807354922157604 | waxay ka | 6 | 40 | 73 |
| 1.0000000001 | wuxuu ka | 6 | 116 | 73 |
| 2.807354922157604 | wuu ka | 6 | 41 | 73 |
| 4.584962500821157 | isaga oo | 6 | 10 | 92 |
| 3.0000000001 | ah oo | 6 | 30 | 92 |
| 4.906890595708519 | u sheegay | 6 | 74 | 10 |
| 4.321928094987363 | guhaad markaas | 6 | 104 | 11 |
| 7.894817763407945 | maxaa yeelay | 5 | 10 | 8 |
| 2.584962500821156 | saalax wuxuu | 5 | 25 | 116 |
| 3.3219280949873626 | shiikhu wuxuu | 5 | 16 | 116 |
| 4.643856189874724 | weyn oo | 5 | 8 | 92 |
| 2.584962500821156 | waxay u | 5 | 40 | 74 |

Sawirka 2aad: is cugashada lammaanayaasha horsan ee ereyada ku jira qoraalka.



Sawirka 3aad: is oggolaanshaha ereyga "illowse"

Raadraac


- Banti G. and Jama Musse Jama, *SomConcor Ver. 1.0*, Redsea Cultural Foundation and Orienta University of Naples, Hargeysa, 2014.
- Shire J. Axmed, *Rooxaan*, Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Xamar, 1973


Halkan waxa aad ka akhridaa haddaba sheekadii oo dhammaystiran.

# ROOXAAN

Waxa qoray :

Jaalle Shire J. Axmed

XAMAR 1973

Maashaan la sarin waa danbay, sara kacaantaaye,
So'du waxay ka quruntaa, kobtaan hilibku saafnayne

(Qamaan Bulxan)

# I

Guhaad wuxuu ku noolaa Muqdishow. Waalidyadiis wuxuu ka soo kacay, markii uu jirey toban iyo shan sano. Guhaad wuxuu ahaa wiil mar la arko fakara. Wuxuu weydiin jirey aabbihiis waxyaalo badan oo uunan aabbihiis uga jawaabi jirin.

Isagu waa inan dheer oo marriin ah. Indhihiisu way madow yihiin, timihiisuna waa yaleex jilicsan. Sankiisa wuxuu uga eg yahay aabbihiis oo wuu toosan yahay. Joogga Guhaad, waa dherer in kastoo uu araxdaaco leeyahay. Markuu soconayo, waxaa la moodaa inuu leeyahay gacmo godgodan. Guhaad sida wiilasha kale, kama carari jirin fakarkii maskaxdiisa ku soo dhaca.

Hindisaha Guhaad wuu fidsanaa. Intuusan iman Muqdishow, wuxuu ku noolaan jirey tuulo. Tuuladaas waxaa lagu magacaabi jirey Gellinsoor. Isagu wuxuu jeclaa markuu yaraa bootinta iyo geeda fuulka iyo dabbaasha. Sida wiilasha kale oo asaaggiisa ah, shinbiraha iyo geedaha ma necbayn.

Guhaad marku cayaarta ka soo noqdo, wuxuu ula imaan jirey aabbihiis weydiimo badan ee ku saabsan dhinaca abuurta; siiba geedaha, dhirta, xoolaha iyo shinbiraha. Maalin ayuu aabbihiis weydiiyay, «Geeduhu maxay dhulka ugu adag yihiin»? Aabbihiis Samantar ma awoodi karin, inuu uga jawaabo [su'aasha] wiilkiisu weydiiyey.

Aabbihiis wuu afjigi jirey wiilkiisa oo wuxuu dhihi jirey, «Ilaah baa naga og wuxuu ulajeeday marku isagu aabuuray geedaha iyo dadka». Guhaad wuu ka caloolxumaa aabbihiis. Isagu wuxuu u maleeyey in aabbihiis uunan jeclayn, hadduu uga jawaabi waayey weydiintiisa. Maalintii dambe, ayaa Guhaad markii uu ka quustay aabbihiis, ayuu weydiintii ula tegay hooyadiis Xaliimo. Wuxuu ku yiri hooyadiis, «Hooyo!. Maxay geeduhu dhulka ugu adag yihiin?». Hooyadiis waxay tiri, «Maandhe, ... e... ee aabbahaa weyddii weydiintaas, isagaa kitaabbada raacdee?» Guhaad ciil buu ugu dhintay aabbihiis iyo hooyadiis. Maalin ayuu Guhaad u tegey waddaadka aabbihiis kitaabka u raca.

Shiikh Saalax, wuxuu ahaa wadaad buuran oo madaxa cimaamad ku sita. Reer Samantar ayuu ku jilnaa. Samantar iyo Xaliimana way jeclaayeen Shiikh Saalax. Maxay u jeclaayeen Shiikh Saalax?. Maxaa yeelay Shiikh Saalax wuxuu uga sheekeyn jirey iyaga dunida iyo asaxaabihii iyo dariiqada Axmadiya iyo siyaaradaha weliyada iyo waxyaalo kale oo badan. Intaas keliya ma ahee, Shiikh Saalax wuxuu cidda u akhrin jirey Munaaqibka iyo Werdiga. Mar la arko Shiikh Saalax wuxuu kilkisha ku wadan jirey kitaabbo dhawr ah. Kitaabbadaas, waxaa ka mid ahaa kitaabka Deyrabiga, Jawaahirul-lamaaca iyo Al-yaaquuti.

Intaas waxaa u weheliyey, kitaab kale oo sir ah. Tuuladaas Gellinsoor oo dhan dadka joogey, way ka biqi jireen Shiikh Saalax. Iyagu waxay dhihi jireen «Shiikhu wuxuu leeyahay karaamo badan. Isagu waa weli Alla» Shiikh Saalax markuu intaas maqlo, ayuu inta qalbiga ka farxo, weji kaduudan ku dhugan jirey dadka. Dadka jirran iyo kuwa dhali waaya iyo kuwa qaaxada qaba, isaga ayaa daawo loogu geyn jirey.

Dadka buka Shiikhu wuxuu u tufi jirey tahaliil, wuxuuna u qori jirey qardhaaso iyo xirsiyo badan. Qofkii kasta oo buka lacag iyo xoolo ayuu ka qaadan jirey. Intaas keliya ma ahee, Shiikhu haddana wuxuu bixin jirey cudurka wadaadda ah, mingiska iyo saarka, ama booranaha. Dadku waxay sheegi jireen, in Shiikhu la hadlo dad aan la arki karin (Rooxaan). Shiikh Saalax wuxuu ku jirey guri weyn oo aqal Soomaali ah. Gurigiisa had iyo goor waxaa ka kari jirey qiiq iyo foox. Shiikh Saalax xaas ayuu lahaa, illowse, xaaskiisu lama degganeyn isaga. Aqal Soomaaliga, Shiikh Saalax ku jirey, gudihiisa waxaa yiilley alaabo qurxo badan. Shiikh Saalax, wejigiisu wuu dhaashanaa mar la arko. Maryihiisa iyo tusbixiisa waxaa ka soo kari jirey catar iyo cuud. Shiikhu wuxuu jeclaa xirashada dharka xariirta ah. Cimaamadihiisu waxay ahaayeen cimaamado yuhuudi ah. Macawisahana wuxuu ka xiran jirey shaab-kursida iyo sabar-hindiga. Shaararka Shiikh Saalax waxay u badnaayeen kuwo cad iyo kuwo diillimo leh. Shiikhu wuxuu lahaa dhawr tusbax oo qaarkood leeyihiin midabyo madow oo birbaraya sida jilbiska iyo haldhaaga.

Dhinac kasta haddii loo eego, Shiikh Saalax wuu ka birbirayey. Isaga oo idilu wuxuu ahaa nin yaab leh. Guhaad intaas oo dhan wuu ku ogaa Shiikh Saalax oo wuxuu u ahaa isagu nin karaamo leh oo Ilaah u dhow. Guhaad wuxuu is yiri, «Alleylehe Shiikh Saalax, ayaa kuu sheegi kara, waxa geeduhu dhulka ugu adag yihiin». Galab ayuu gurigiisii ugu yimid isaga oo foox iyo luubaan ay ka karayaan. Irridda ayuu ka istaagay gurigii. Guhaad wuxuu yiri, «Shiikh Saalax ma joogaa»?. Shiikh Saalax ma joogaa?. Xaggee buu jiraa?» Guhaad cod rag ayaa u jawaabay. «Waa isagii oo kula hadlayee soo gal!». Guhaad wuu soo galay. Markuu soo galay, ayuu arkay nin haybad leh oo hortiisa fadhiya. Guhaad wuxuu fariistay kaadka aqalka. Si miskiinnima ah oo gariir leh, ayuu u weydiiyay Shiikhii weydiintiisii wax badan wareerisey. Guhaad wuxuu yiri «Shiikh Saalax! adigaa Shiikh karaamo iyo cilmiba lehe, bal iiga baar kitaabbaada weydiintan. «Maxa max.... Maxaa geeduhu ugu adag yihiin dhulka?». — Shiikh Saalax marku maqlay hadalkaas ayuu wareeray. Wuxuu la wareeray in weydiintaas hadda ka hor aan qofna weydiin. Dadku siduu u badan yahay, Shiikha wuxuu wax ka weydiin jirey dhinaca rooxaanta iyo tahaliisha sida loo tuffo. e...e ... ee.... e waydiintaad i weydiisay, waa arrin culus!». — Waxaa ugu jawaabay Shiikh Saalax. Guhaad marku maqlay in weydiintiisu ay culusaatay, yuu naxay. «Adeer, Shiikh Saalax!! weydiintaydu maxay ku culusaatay? — Waxaa yiri Guhaad. «.... Um.... u.... arrintaas Ilaah ayaa naga og, wuxuu ulajeeday. Allaahu aclamu wa

rassuulahu» — Intaas ayaa Shiikh Saalax ku daray hadalkiisii. Marka hadalkaas uu leeyahay Shiikh Saalax wejigabax iyo yaxyax ayaa ka muuqdey.

«Maandhow weydiimahaas oo kale carruurtu dadka ma weydiiyaan,» — waxaa yiri Shiikh Saalax. Wuxuu wiilkii ka dhaadhiciyey, in dhulka iyo cirka sidii loo uumay ay tahay sir Ilaah oon aadmigu cilmi ku lahayn. Shiikh Saalax wuxuu uga sheekeeyey wiilkii, inay Moqdishow jiraan niman culummo ah oo aad iyo aad dhinac walba uga war haya.

Guhaad wuxuu jecleystay inuu Muqdishow u dhoofo oo uu soo arko culummadaas oo markaas weydiimmo badan uu weydiiyo.

Sidaas ayuu maalin maalmaha ka mid ah, kaga soo tegey Gellinsoor. Guhaad wuxuu ku soo dhuuntay baabuur weyn oo xoolaha iyo dadkaba qaadda. Baabuurka gaarigiisa ayuu la galay xoolihii. Hebeynkii oo idil, ayuu baabuurkii la socday isaga oon cidu arkin. Meel dhexe baabuurkii markuu la marayey, ayuu ka soo baxay gaarigii. Digadii ariga iyo kaadidiisii ayuu Guhaad u adkeysan waayay. Shufeerkii baabuurka wadey, ayaa loo sheegay wiil inuu saaran yahay baabuurka. Shufeerkii wuu iska daayey Guhaad markii uu warsaday meeshuu u jeedey. Guhaad been ayuu u sheegay Shufeerka. Wuxuu u sheegay inuu u socdo aabbihiis oo deggan Muqdishow. Shufeerku wuxuu ahaa nin wanaagsan oo wuu iska daayey wiilkii. Sidaas ayuu Guhaad ku yimid Muqdishow. Muqdishow, waxaa degganaa Guhaad habaryartiis. Habaryartiis waxaa qabey nin dawladda u shaqayn jirey. Habaryartiis waxay ku jirtay daar afar qol ah oo leh musqul iyo barxad. Geelle wuxuu ahaa ninkii habaryartiis qabey. Geelle markii loo sheegay wiilka imaatinkiis, ayuu ku farxay. Geelle wuxuu ahaa nin aad iyo aad u wanaagsan. Imaatinka wiilka waxba kama nixin. Guhaad markuu arkay Muqdishow inay tahay magaalo weyn, ayuu ku farxay. Wuxuu ku arkay Muqdishow daaro dhaadheer iyo baabuurro isdaba maraya iyo nalal kala midab ah. Haddana wuxuu ku arkay magaalada bad weyn oo dadku ku dabaalanayaan. Wuxuu kaloo ku arkay Muqdishow shineemooyin iyo dukaammo alaabo qurqurxani ay taallo. Habaryartiis Caasha waxay dukaamada uga soo iibisay surwaal iyo shaati iyo kabo. Sidaas ayuu ugu ekaaday Guhaad wiilashii kale. Muqdishow intuu joogay, Isagu waxyaalo badan ayuu bartay, inkastoo uunan iskuul dhigan weli. Guhaad iskuul inuu dhigto ma uu jecleyn, maxaa yeeley, wuxuu doonayey inuu noqdo Shiikh weyn oo sida Shiikh Saalax oo kale ah. Hal sano intii ah, ayuu dhigaynayey dugsiga.

Sannadkaas wuxuu ku dhameeyay jus-camma. Guhaad markaan wax wuu akhrin karaa, wuuna dhigi karaa, illowse ma yaqaanno wuxuu akhriyayo macnahooda. Ardo badan ayuu la dhigan jirey dugsiga. Ardadu waxay fariisan jirtay dhulka. Quraanka waxay ku dhigan jireen looxyo. Khadda wax lagu dhigo, ardadu iyadaa sameysan jirtay. Dugsiga markuu imanayo Guhaad, wuxuu soo xiran jirey macawis, maxaa yeelay macallinku muunan jeclayn ardaygii qaba surweel. Arada markii macallinku ciqaabayo, ul ayuu la dhici jirey, khadna madaxa ayuu

kaga sayrsayri jirey ardaygii gaf sameeya. Habeynnada qaarkood, Guhaad wuxuu seexan jirey dugsiga. Macallinku wuxuu u dirsan jirey ardadiisa roobdoon. Guriga wuxuu kaloo uga dirsan jirey ardata alaabo. Arbaca la arko, ardadu waxay uga soo uruurin jirtay macallinka lacag xaafadaha. Guhaad maalin ayuu gafey cashar loo dhigay. Maalintaas ayaa macallinkii diley. Maalin dambe, ayaa macallinkii u dirsaday Guhaad gurigiisa inuu uga keeno macawistiisii. Guhaad wuu soo daahay, maxaa yeelay, jidka ayaa maalintaas baabuurro badani marayeen. Guhaad baabuurrada wuu ka baqaa. Macawistii markuu u keenay macallinkii, ayuu macallinkii carooday oo diley Guhaad. Guhaad usha wuu neceb yahay. Maalintaas macallinku aad iyo aad ayuu u dhaawacay Guhaad. Afar beri intii ah, ayuu Guhaad guri la jiifey dhaawicii uu macallinku u geystey. Dhakhtarku wuxuu faray Guhaad inuunan guriga ka tegin teer iyo intii uu ka fayoobaado. Markii Guhaad fayoobaaday, ayuu iska daayey dugsigii. Sidii dhaawucu uga gaaray Guhaad dugsiga, isagu marna muu jeclaan dugsi dambe. Guhaad wuu jeclaa inuu noqdo wadaad ama Shiikh, illowse, taasi uma ay suurtoobin. Isagu wuxuu iska aadi jirey masaajidyada. Weliba wuxuu jeclaan jirey meelaha fooxu ka karayo.

Shan sano markuu joogay Guhaad Muqdishow, ayuu shoqo ka helay. Maalintii isagu wuxuu ku shaqayn jirey 3 shilin. Makhaayad ayaa habaryartiis uga soo heshay shuqul. Maqalka ayuu fadhiyi jirey. Ninka makhaayadda lihi si weyn ayuu u aamminsanaa Guhaad. Guhaad marna wax kama xadi jirin ninka makhaayadda leh.

Maalin isagoo u jira shaqo dibedda, ayaa nin makhaayadda wax ka cuni jirey ka xaday maqalka 50 shilin. Lacagta markii tuuggu xadayey, Guhaad dibedda ayuu ku maqnaa. Wuxuuna moodayey, inuu maqalka si wanaagsan u xiray. Guhaad markii uu ku soo noqday makhaayaddii, ayuu ogaaday inuunan xirin maqalkii.

Markii uu soo dhiftay maqalkii, ayuu arkay inay lacagtii maqan tahay. Wuu naxay markaas oo is ciilkaanbiyey. Guhaad in badan ayuu furuuryihiisa qaniinsanaa. Xaggee buu ka helaa tuuggii lacagta xaday?. Xerada booliiska ayuu soo aaday. Wuxuu u sheegay in lacag 50 shilin ah lagaga xaday makhaayadda. Booliskii waxay ku yiraahdeen «iska tag, innaka ayaa dooni doonna tuuggiiye». Intaas ayaddo la joogo, ayaa ninkii makhaayadda lahaa yimid. Guhaad wuxuu u sheegay ninkii in lacagtii laga xaday. Ninkii wuu carooday oo ka xumaaday wixii dhacay. «Nuur! iga raalli ahow, dambi anigu kuma lahayn. Tuug ayaa naga xaday lacagtii—!» Hadalkaas waxaa yiri Guhaad. Guhaad maalintaas wuu madoobaadey oo foolxumaaday. Ninka makhaayadda lehi Nuur, wuxuu ahaa nin wanaagsan oo aad iyo aad u jecel wiilka. Waxba uma uunan sheegan ee wuu iska diray. Wuxuu ku yiri Guhaad, «Makhaayaddayda mar dambe kama shaqaynaysid ee iga tag!». Hadalkaas markii Nuur yiri, ayaa ilmo ku soo joogsatay indhihiisa. «Nuur.... Nuur.... Nuur! iga rumeyso, anigu lacagtaadii ma qaadan, waxaa qaatay tuug!». Hadalladaas Guhaad ku hadlay oo runta ahaa, Nuur ma rumaysan mana beenaysan. Nuur markaas wuxuu ka fakarayay lacagtii keliya ee hadalka

Guhaad leeyahay kama fakarayn, mana maqlayn. Guhaad markuu ogaadey inaan qofna rumaysanayn, ayuu iska tegay. Wuxuu aaday gurigii habaryartiis. Habaryartiis iyo ninkeedu iyaguna aad bay uga xumaadeen hadalkii markii ay maqleen. Ciil darti, Guhaad habeynno ayuunan seexan jirin. Wax badan ayuu ka fakari jirey arrintii ka qabsatay makhaayadda iyo sidii uu u heli lahaa wadaad Ilaah yaqaan oo runta u sheega Nuur, in lacagtii tuug xaday. Maalin ayuu habaryartiis u yimid. Wuxuu ku yiri, «Habaryar!!». Habaryar Caasho, waxay tiri, «Heeh!» «Adiguna ma been buu kula yahay hadalka aan sheegayo?. Sidaas waxaa yiri Guhaad. Habaryar Caasho, waxay tiri, «Maandhow Ilaah baa iga yaqaanna, umase malaynayo inaad been sheegayso!». Guhaad intaas markuu maqlay, ayaa xoogaa qalbigii u degay, maxaa yeelay, wuxuu moodayey, in habaryartiisna la qabto rayiga dadka moodaya, inuu isagu lacagtii lunsaday oo uu xaday.

Habaryartiis, ayaa waxay u sheegtay inay jiraan wadaaddo wax sheega oo wax walba og.

«Habaryar! Wadaadka ugu wax aqoon badani, xaggee buu ku jiraa?. Wuxuu warsaday Guhaad habaryartiis. Waxay u sheegtay, inuu deggan yahay wadaad karaamo lehu xaafaddaas Boondheere. Shiikha magaciisa, waxaa la yiraahdaa «Shiikh Muxsin». Guhaad markaas wuxuu haystay lacag 200 oo shilin ah oo uu ka shaqaystay makhaayadda. Boqol shilin ayuu inta jeebka ku soo ritey, buu soo aaday xaafadda Boondheere. Dadka ayuu weydiiyey meesha uu ku jiro Shiikh Muxsin. Meesha Shiikh Muxsin ku jiro, waxay ahayd caan. Qof waliba wuu yiqiin. Naagaha iyo carruurta iyo duqowda iyo dadka oo dhammi way yaqiinneen xaafadda iyo guriga uu Shiikh Muxsin deggan yahay. Shiikh Muxsin wuxuu ahaa wadaad weyn oo karaamo leh. Dadku waxay sheegaan in wax walba ay u kashifan yihiin Shiikha. Shiikh Muxsin dadkoo dhammi wuu ka cabsadaa, maxaa yeelay, calaamo ayuu lahaa. Shiikh Muxsin, isna, wuxuu ismoodi jirey in taasi run ay tahay. Habeynkii haddii guriga loogu yimaado, xiddigaha ayuu daawan jirey. Shiikh Muxsin wuxuu qabaa labo naagood, carruurna wuxuu leeyahay shan gabdhood iyo saddex wiil kuwo kalena way kadhinteen.

Shiikha indhihiisu way xariiran yihiin garkiisuna wuu cillaaman yahay. Ilkaha sare laba fool waa dahab. Hareed weyn ayuu leeyahay Shiikh Muxsin. Shiikh Muxsin dadka in yar ayuu la hadlaa. Isagu ma jecla in afkiisa la arko. Shiikhu dadka hortiisa weligiis kuma qoslin. Bishimaha Shiikh Muxsin way dhaadheer yihiin. Da'diisu waa ugu dhawaan 40 sano. Wuxuu xirtaa macawis sabarhindi ah iyo jubbad. Wejigiisu mar walba wuu dufansan yahay. Calaacalaha Shiikh Muxsin way cadcad yihiin oo jilicsan yihiin. Kabo saandal ahna, wuu qabaa. Wejigiisu wuu fidsan yahay oo xaad yar ayuu leeyahay. Sanqaroorka Shiikh Muxsin wuu dheer yahay. Laba daan oo waaweynna, wuu leeyahay. Markuu soconayo, waxaa la moodaa inuu jiitamayo. Tallaabo ma boobo oo si aayar ah ayuu u socda. Haddallada weligiis kuma degdego. Markuu jawaabayo cabbaar ayuu aammusaa. Markuu hadlayo, waxaad mooddaa in indhihiisu ku dhaafsan yihiin. Markuu dadka rooxaanta uga warramayo, Shiikhu wuxuu ka qaataa lacag

badan. Guriga Shiikh Muxsin waa miterkuubbo laba dabaq ah. Hoos waxaa ku jira minyaradiisa, korna waxaa deggan minweyntiisa.

Minweyntiisu waa haweeney dheer oo cas. Waa duq ku dhow konton sano. Waagey yarayd Cawrala, way quruxbadnayd. Laf iyo joogba way is le'ekayd. Wejigeeda waxaa ka muuqda duuduub iyo carfadyo, ku tusaya inay silic iyo xakaar wax badan ku noolayd. Cawrala carrurta badi iyadaa dhashay. Wax badan ayay ka masayrsanayd minyarada, illowse, waxay ogaatey hadda inay duqowday oo carruur iyo raaxo aynan u dhimmanayn. Sidaas daraaddeed Cawrala way iska aamustaa. Shiikh Muxsin haddii ay ka carooto, wuxuu u sheegaa inuu furi doono, haddaynan masayrka iska deyn. Nadiifo waxay ahayd minyaradii Shiikh Muxsin. Waa haweeney madow oo dhuuban. Indhaheedu way madmadow yihiin. Timaheeduna way adadag yihiin. Waxay u dhashay Shiikh Muxsin laba carruur ah, wiil iyo gabadh. Shiikh Muxsin wuu jecel yahay minyaradiisa. Nadiifo waa baarri. Hadalka Shiikheeda way maqashaa. Salaaddana way tukataa. Inkastoo uu hadalka ku gubo Shiikhu Nadiifo haddana laba tixood ka badan ma tiraahdo. «Shiikh Muxsin i cafi!» iyo, «Waa yahay Shiikh Muxsin!». Shiikh Muxsin markii uu intaas maqlo, laabtu way u degtaa. Cawralase waxay ka xanuujisaa qalbiga Shiikh Muxsin. Markuu isagu la hadlo Cawrala indhaheeda duuduubka luhu, way furfurmaan oo gudguduutaan. Cawrala waxay xusuusataa dhibaatadii ay la soo martay Shiikha markay yarayd iyo carruurta koriskeeda waxay dhib ka soo mudatay. Cawrala markay aragto Nadiifo, way masayrtaa, hase yeeshee indhaheeda markay aragtana, way iska aammustaa. Cawrala waxay og tahay, in Nadiifo ay tahay miskiinad aan danbi lahayn. Markaas ayay waxay ku tiraahdaa iyada: «Heedhe, Ilaah baa faxane, iska aammus!».

Shiikh Muxsin wuxuu hadda ka hor guursaday shan iyo toban naagood. Dhammaantoodna wuu wada furay. Waxaa keliya oo ka danbeeya Cawrala iyo Nadiifo. Naaguhuu faray badi, waxay ka yimaadeen Jubbada Sare, Banaadir iyo degmadaas Boosaasood. Nadiifo waxay ku dhalatay degmada Banaadir. Aabbeheedna wuxuu ahaa wadaad la saaxiib ah Shiikh Muxsin. Nadiifo aabbeheed wuu dhintay. Markii aabbeheed dhintayna, waxay jirtay shan iyo toban sano. Aabbeheed intuunan dhiman ka hor, ayuu ku xiray Shiikh Muxsin gabadhiisa. Isaga wuxuu kala dardaarmay, inuu u dhaqaaleeyo gabadha, iyadana wuxuu kula ballamay, inay Shiikha u noqoto baarri iyo mudeecad. Nadiifo aad iyo aad ayay u jeclayd aabbaheed sidaas daraaddeed ayay ku fulisey ballankiisii. Nadiifo qaraabo ma leh oo aabbaheed iyada keliya ayuu ilmo ka dhalay. Intaas ka sokow adeerradeed iyo eeddooyinkeed way wada dhinteen. Cid kale oo aan ahayn Shiikha ma ay taqaan. Shiikh Muxsin markii uu ku caroodo Nadiifo, madaxa ayay laalaadisaa oo indhaha galac ka siisaa. Nadiifo weligeed indho kulul kumay eegin Shiikh Muxsin, maxaa yeelay waxay ka biqi jirtey, inay caro Ilaah ku dhacdo!. Shiikha markii dad qalaadi la jiro, aad isagu uma hadlo, markiise uu la joogo haweenkiisa keliya daartu way gariirtaa, codkiisana kor ayuu u dhiga.

Wuxuu ku yiraahdaa iyaga: «Aammusa!, shayaadiin yahay! Aa.... aammusa shayaadiin yahay, shar qabooyin yahow!». Cawrala iyada oo ka cabsanaysa in la furo, iyo iyada oo og in dalqadaheedu ku shiran yihiin saddex goor inuu ku celceliyo tixahaan sahlan, «Naa iga bax waad iga furan tahaye!», ayay iska aammustaa oo gurigeeda hoosta ka xirataa. Nadiifana waxay xusuusataa dardaarankii aabbaheed oo iyana way iska luuddaa. Labada naagood markii ay iska shib yiraahdaan, ayaa carruurtuna iska xasilaan. Taas keliya ma ahee, guriga inta u dhow oo dhan ayaa wada xasisha, markii Shiikhu hadlayo. Shiikh Muxsin markii uu caroodo, labadiisa fool oo dhaadheer waxay ka soo bidhaamaan bishimihiisa dhaadheer. Shiikh Muxsin saddex jeer ayuu wax cunaa. Wuxuuse aad wax u cunaa qadada. Dad badan, ayaa wuxuu allabari ugu keenaa waxaro dhaylo ah Shiikha, lacagtuna Shiikha marna kamay dhammaato.

Intaas isaga oo og, ayuu u yimid Guhaad Shiikha karaamada leh. Wuxuu u shegay in lacag laga xaday, ugana sheekeeyey wixii dhacay iyo sidii shaqada lagaga saaray. Guhaad markaas uu Shiikha la hadlayey, madaxiisu hoos ayuu u laalaadey, isaga oo ulajeeda middaas xurmo. Guhaad markaas wuxuu gacanta Shiikha ugu laabay 100 shilin. Shiikh Muxsin markuu lacagtii qaatay, ayuu aad u farxay. Wuxuu Guhaad ku yiri; «Rooxaantii hadda ma ioogto ee berri ii imow!. Guhaad markii uu maqlay arrintaas, habeenkii oo idil wuxuu ku welwelsanaa sidii uu u qaban doono tuuggii lacagta ka xaday iyo sidii uu ugu muujin doono danbi la'aantiisa Nuur oo uu shuqulkii ugu soo noqon doono.

Guhaad habeenkii oo dhan muu seexan. Wuxuu dhererayey waagu intuu ka baryo. Sariirta ayuu habeynkii oo idil ku galgalanayev. Waagii markuu baryey, aroortii, ayuu Guhaad ku laabtay gurigii Shiikha. Deydka ayuu fariistay. Wuxuu sugayey intuu Shiikhu hurdada ka kacayo. Toban saac markay ahayd, ayuu Shiikhii u yeeray Guhaad. Wuxuu u sheegay in xalayto uu la hadlay rooxaantii iyo inay u baahan tahay alaabo yaryar. Wuxuu sheegay in alaabtaasi tahay cuud iyo jaawe iyo catar iyo Barafuun. Guhaad hadalkii Shiikha war kama celine, wuxuu ku degdegay dukaamada. Wuxuu soo gaday wixii Shiikhu ku yiri soo gad.

Alaabtii uu soo gaday waxay ku fariistay 70 shilin. Guhaad alaabtii wuxuu ula orday Shiikha. Wuu u geeyey. Shiikhu alaabtii oo idil markii loo keenay, ayuu wada ursaday. Meel ayuu iska dhigay. Wuxuu Guhaad u sheegay, inuu caawa u soo noqdo. Maalintaasi Guhaad waxay u ahayd maalin wanaagsan. Badda ayuu inta iska aaday ku dabbaashay. Bacaadka badda ayuu fadhiyey galabtii oo idil. Wuxuu eegayey hirarka badda. Xoogaa yar ayuu Guhaad seexday, isagoo kuriyoonaya rooxaan. Maskaxdiisa ayuu wuxuu ka arkay hoosas dad u eg oo madmadow. Hoosaskaasi waxay lahaayeen dabooyin dhaadheer iyo garar juqjuqfsan iyo saman balballaaran. Hoosasku way duulduulayeen. Waxay ku war- wareegayeen agahiisa. Qaararka dambe, waxay uga ekaayeen daanyeer. Oogadooduna waxay lahayd timo dhaadheer. Afafkoodana waxaa ka karayay holac. Sidii qiiq ayay u agmarayeen Guhaad. Riyada markii uu ku arkay rooxaantaas, Guhaad wuu farxay, maxaa yeelay wuxuu is lahaa rooxaantu way kaaga

abaalgudi doontaa tuuggii lacagta kaa xaday. Cawadii ayuu Guhaad ku soo laabtay gurigii Shiikha. Shiikhu wuxuu geeyay Guhaad guri duq ah oo cariish ah oo ku ag yaalla guriga Shiikha. Shiikh Muxsin wuxuu ku yiri Guhaad, «Wiilkay halkaan soo fariiso oo albaabka xir». Guhaad meeshii ayuu fariistay oo xiray albaabkii isaga oo naxsan.

Wuxuu ka baqayey rooxaantii uu riyada ku arkay. Cariishku wuxuu leeyahay daldaloollo. Gudaha cariishka waxaa ku daahnaa maryo duqoobey oo catir la moodo. Guriga cariishka ah, waxaa ka soo urarey barafuun iyo catarcuud. Markuu fariistay Guhaad oo in yar fadhiyey ayuu wareeray. Madaxa ayaa laga qabtay. Xoogaa yar intii aan la joogin, yuu maqlay codad yaryar oo kala jaad ah. Codadkaas waxaa ku jirey codad haween. Guhaad wuu naxay markuu codadkaas maqlay. Wuxuu u maleeyey in rooxaantii uu riyada ku arkay ay timid. Kolkaas ayuu haddana sii naxay.

Wadnihiisu wuxuu lahaa rug-rug. Markaas ayuu albaabkii furay markii ay neeftii ku noqotay. Cariishku khalfado ma leh, neecawduna kama soo gasho. Albaabka markuu furay Guhaad, ayuu Shiikhii qayliyey. Wuxuu yiri, «Wiilkay albaabka ha furin», «Albaabka ha furin». Guhaad markaas ayuu xiray albaabkii. Shiikhii, wuxuu ku yiri wiilkii, «Maxaad albaabka u furtay shaydaan yohow?». Intaas wuxuu raaciyey Shiikhii, in Guhaad iska tago maanta, maxaa yeelay rooxaantii way carartay markii uu furay albaabka. Guhaad wuu iska tegey isago oo yaabban kana shakisan carada Shiikha iyo dhaqdhaqaaqiisa. Guhaad gurigii buu iskaga luuday. Wuxuu ogaadey wixii uu ku arkay riyada inayan imaan. Habeynkaas wuu iska seexday sariirtiisii. Cawadii danbe ayuu u soo noqday Shiikhii. Cariishkii ayay haddana wada galeen. Sidii oo kale ayaa codadkii kala duwanaa haddana u yeeryeereen. Guhaad markan muunan nixin.

Indhihiisa ayuu furay. Gurigii waxaa ka yeeray qaylo waxaana ka soo baxay bulaan. Guhaad wuu farxay markaan, wuxuuna moodayey inay rooxaantu u sheegi doonto meesha laga helayo tuugga. Guriga intaas waxaa ka soo baxayo caraf iyo udgoon. Shan iyo toban daqiiqo kaddib, ayaa Shiikhii wuxuu ku yiri Guhaad, «Lacagtii waxaad ka helaysaa guriga aad seexatid». Guhaad wuxuu yiri, «Xaggee, Shiikh Muxsin?». Shiikh Muxsin wuxuu ku yiri Guhaad, «Waxaad ka helaysaa barkinta aad ku seexatid hoosteeda!!». Guhaad markaas rayrayn darteed, ayuu kor u boodey. Gurigii ayuu ku orday. Gurigii markuu tegey, ayuu barkintii hoosteeda ka dayey lacagtii. Guhaad wuu ka waayay lacagtii barkinta hoosteeda. Ciil ayuu marakan u go'ay. Faruuryihiisa ayuu qaniiney. Wuxuu moodey inay rooxaantii iyo Shiikh Muxsinba ayan rabin.

Cawa danbe ayuu ku noqday gurigii Shiikh Muxsin. Markaan wuxuu doonayey inuu ogaado runta keliya. Guhaad markaan danbe wuxuu ku soo qaatay wax jeebka. Gurigii cariishka ahaa ayuu soo galay.

Gurigu wuxuu ahaa mugdi, Shiikhuna wuxuu fadhiyey gasada danbe oo guriga. Guriga waxaa ka soo karayey foox iyo cuud. «Shiikh Muxsin ma joogaa?.... Shiikh .... Shiikh Muxsin ma joogaa?». ayuu Guhaad warsay. Shiikhii inyar inta aammusay, ayuu u jawaabey Guhaad, «Wuu joogaa». Guhaad wuxuu u sheegay Shiikha inuunan lacagtii helin, tuuggiina uunan qaban. Shiikhii wuxuu faray Guhaad, inuu fariisto halkaas oo uu sugo inta uu kala hadlayo rooxaanta. Guhaad goobtii ayuu fariistay. Waxaa yeeray codad kala jaad ah sidii hore oo kale. Guhaad markaan wuu faristay inta maskaxda iyo maankaba furay. Wuxuu ku arkay guriga meelihiisa dulduleela wax dhaqdhaqaaya. Guhaad markaas ayuu karbuuno uu jeebka ku watay, la soo baxay oo ku iftiimiyey meelihii wax ka dhaqdhaqaaqayeen. Wuxuu ku arkay Shiikhii oo ganbar ku fadhiya oo qaawan, Nadiifana ag fa- dhido. Shiikha lugihiisa waxaa ku xirxirnaa xargo ka soo laalaada meelaha dulduleela. Shiikhu xargahaas wuxuu ku xirxirey looxyo iyo daasado isku dhacaya oo qaylo samaynaya. Codad kala duwanna Shiikhu wuu ku hadlayey. Nadiifana waxay samaynaysay codad haween oo kala jaad ah. Fooxa iyo cuudkuna waxay ka caawimi jireen dhinaca maskaxda saamaynteeda.

Guhaad markuu ogaaday sidaas, ayuu isaga oo caraysan iska baxay. Intuunan ka bixin gurigii Shiikh Muxsin, ayuu wuxuu xusuustay maahmaahdii lahayd, «Meeshii iftiin soo galo mugdi wuu ka baxaa».

Dhammaad.